



Prince William County

PUBLIC SCHOOLS

Providing A World-Class Education

®

LATANYA D. MCDADE, Ed.D.

Kormeeraha guud ee Dugsiyada

Waalidka/Masuulka Qaaliga ah:

Ku soo dhawoow Dugsiyada Bulshada Gobolka Prince William (PWCS), dugsi bulsho kala duwan meeshaas oo wax ka badan 149 luuqadood looga hadlo. Ka lug yeelashada qoyska iyo bulshada waa ka go'naanta ugu muhiimsan ee xeeladda Qorshaheena afarta-sanno, waxayna muhiim u tahay hubinta inaan si wada jir ah uga shaqeyno inaan sameeyno kala duwanaansho wanaagsan ee waxbarashada iyo mustaqbalka cunugaaga. Maadaama aad tahay jaalka waxbarashada, waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino wixii ah adeegyadda fasirida iyo turjumista ee laga yaabo inaad u baahato.

Dhammaan qoraalada dugsiga waa Ingiriis; si kastaba ahaate, dukumintiyada muhiimka ah iyo isgaarsiinta muhiimka ah ayaa loogu fasiraa luuqadaha inta badan bulshada codsato. PWCS ayaa sidoo kale bixiyo fasirayaal ama turjubaano xirfadle ah ee ka caawiyo qoysaska luuqadaha badan ku hadlo inay fahmaan dokumentiyo leh maclumaad muhiim ah. Tan waxaa ku jira xaquuqaha ardayga iyo waaladiinta, masuuliyadaha, filashooyinka, iyo arrimaha kale ee dugsiga la xiriiro oo ay ku jiraan faa'iidooyinka iyo adeegyada loo heli karo ardayda.

Turjumaanada ayaa sidoo kale ku taageeri karo adeegyada fasiraada ee loogu tallogalay shirarka waalidka/macalinka ee la xiriiro arrimaha ardayga oo bilaash ku ah qoysaska.

Waxaad isticmaali kartaa kuwa walba oo qaababkaan markii aad u baahantahay caawin gaar ah:

- Onleenka—booqo PWCS.edu oo xullo midkood “Auto Translate” ama “PWCS Translations” ee dusha bidix ee bogga. Fasiraada kumbuyutarka ah waxay noqon karaan kuwa aan sax saneyn laakin weli waxay leeyihii xiriiro qiimo u leh warbixinta dugsiga. Haddii aadan laheyn kumbuyutar, fadlan la soo xiriir dugsiga ardaygaaga.
- Qof Ahaan—booqo dugsiga canugaaga ama mid ka mid ah Xarumaha Global Welcome. Ka soo wac Manassas Center 571-402-3800 ama Woodbridge Center 571-374-6813. Haddii qof ku hadlo luuqadaada aan loo heli karin qof ahaan, shaqaale ayaa isticmaalayo warqadda fasiraadaha luuqada si u go'aansado baahiyadaada luuqada oo kaa caawiyo inaad heshid adeegyada turjumaanka.

Markii aad la xiriireysid dugsigaaga, waxaa lagu weydiinaya inaad sheegtid kuwa xiggo:

- Magacaaga iyo magaca canugaaga;
- Dugsiga canugaaga, heerka fasalka, iyo magaca macalinka;
- Shaqsiga (oo magac ama shaqo ahaan) ee aad rabtid inaad la hadashid, iyo mowduuca wada hadalka; iyo
- Lambarka taleefonka iyo saacada ee sida wanaagsan lagaagala soo xiriiri karo.

Haddii canugaaga keeno guriga fariin ka timid dugsiga oo codsaneyso kulan, ama haddii aad rabtid inaad la diyaarsatid wada hadal macalinka ama sarkaal kaloo dugsiga ah, fadlan isticmaal qaababka kore si aad u codsatid caawinta adeegyada turjumaanka. Xafiisyadeena ayaa kula soo xiriirayo sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtogalka ah.

Waxaan rajeyneynaa inaan wada shaqeyno si aan u hubino guusha ardaygaaga (ardaydaada)!

Daacadnimo,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "LaTanya D. McDade".

LaTanya D. McDade, Ed.D.
Kormeeraha guud ee Dugsiyada